

Tusmada Waaliddiinta SPPS ee Barnaamijka Schoology



Ku soo dhawaada Schoology! Qormadan tusmada ah waxay waaliiddiinta ka caawinaysaa sidii ay u fahmi lahaayeen waxa uu yahay Schoology iyo qaabka loo isticmaalo. Wixii faah-faahin ah waxaad ka heli kartaa shabakadda Xarunta Caawinta Schoology oo ah support.schoology.com.

Waa Maxay Schoology?

Schoology waa Hab ama Nidaam Waxbarasho oo ku salaysan internet-ka oo kaa caawinaya inaad ogaato fasallada, cashirrada iyo natijada imtixaanka ee ilmahaaga. Wuxuu qorisoon Schoology u isticmaali kartaa inaad:

- Fiiriso/aragto koorsooyinka ardaygaaga iyo hawlaha fasalka.
- Fiiriso/aragto hawlaha fasalka ama imtixaanada soo socda ama kuwa xilligoodii la dhaafay.
- La socoto ogeysiisyada iskuulka iyo koorsooyinka.
- Si guud uga war-haysid waxbarashada ardaygaaga

Sida Loo Galo/Isticmaalka Schoology

- Booqo bartan spps.org/onestop ka dibna waxaad gujisaa/riixdaa Schoology.
- Sanduuqa kuu furma, waxaad galisaa qoraalkaaga (username) -One Stop- ee ah (g#####) iyo qoraalka sirta ah (password) ee laguugu soo diray boostada.
- Haddii aadan haysanin qoraalkaaga (username) ee One Stop, fadlan la xiriir xafiiska iskuulkaaga si laguu caawiyo.

Isticmaalka Akoontiga Schoology ee Waalidka

Waxaad la socon kartaa waxyabaha uu ilmahaagu samaynayo

Riix batanka yar ee ku xiga magacaaga ee ku yaalla dhinaca sare ee midig. Riix magaca ilmahaaga ee kuu soo baxa si aad u dhex-gasho akoontiga ilmahaaga.

Bogga (Home Page)

Waalidka iyo ardayguba waxay leeyihii labo bog (Home Page) oo kala gaar ah. Sida Facebook-ga oo kale, bogga (Home Page)-ka ah waa meesha ugu horreysa ee qofku uu arkayo marka uu guda-galo Schoology. Halkan waxaad kala socon kartaa waxyabiihi la soo qaybtay iyo waliba warbixinada cusub ee soo socda.

Koorsooyinka (Courses)

Halkan waxaad kala socon kartaa dhammaan koorsooyinka waxbarasho ee ilmahaaga. Si aad faah-faahin ku saabsan cashirrada u hesho, riix koorso walba.

Kooxaha (Groups)

Inta badan halkan waxaa loo isticmaalaa macluumaadka guud iyo waxyabaha sida gaarka ah loo xiiseeyo. Tusaale, waxaa laga yaabaa in ilmahaagu ka mid yahay kooxda ciyaartoyda, sidaa awgeed waxaa laga yaabaa in kooxdaasi ay leedahay hal Schoology. Halkan laguma daabaco natijada gaarka ah ee ardayga.

Ogow: Waalidku wuxuu arki karaa macluumaadka ku qoran Schoology-ga ardaygiisa oo kaliya, sida **Koorsooyinka iyo Kooxaha**. Waalidku ma arki karo macluumaadka ardayda kale, kumana biiri karo koox cusub, islamarkaana wax qoraal ah kuma qori karo.



Isticmaalka Akoontiga Schoology ee Ardayga:

The screenshot shows the Schoology dashboard. On the left, a sidebar lists 'Summary' (1), 'Grades/Attendance' (2), 'Mastery' (3), 'Calendar' (4), and 'Messages' (5). The main area displays 'Student Activity - Enrollments' with courses like 'B: Spanish: Section 2' (88%), 'Algebra: Section 1' (95%), 'English 10: Section 1' (92%), and 'U.S. History: 3rd Period' (92%). It also shows 'Groups' (3) including 'JV Soccer' and 'Students'. On the right, 'Recent Grades/Attendance' (4) shows graded assignments, tests/quizzes, discussions, and attendance. 'Overdue' tasks (5) include 'Great Gatsby Essays Due 12:59 am'. 'Upcoming' events (6) include 'Thursday, July 16, 2015' and 'Tuesday, July 21, 2015'.

1 Si aad u aragto maclumaadka Schoology ee ilmahaaga, guji/riix qoraalka dhinaca bidix ku qoran:

Maclumaad Kooban (Summary): Si aad u aragto koorsooyinka iyo natijada ardayga, waxaad riixdaa (Enrollments) oo ku qoran sanduuqa dhexe, ama (Student Activity) oo ku qoran sanduuqa dhexe.

Natijada (Grades): Halkan waxaad kala socon kartaa natijada imitxaanada koorsooyinka ee ilmahaaga.

Mastery: Halkan waxaad halkan kala socon kartaa horumarka waxbarasho ee ilmahaaga haddii iskuulkiinu isticmaalo nidaamkan.

Kalandaariyaha (Calendar): Wuxaan kala socon kartaa waxyaabihii la soo dhaafay iyo waxyaabaha soo socda, sida imtixaanada ardayga adigoo gujinaya sanduuqa dhinaca midig ee (Upcoming).

Farriimaha (Messages): Waalidku ma arki karo farriimaha qoraalka ah.

2 Dooro qeybta (**Enrollments**) si aad u aragto koorsooyinka iyo natijada ardaygaaga. Haddii koorsadu wali aysan dhammaystirmanin, natijada lama arki karo sida tusaalaha kor ku qoran ee maadada U.S. History. Koorso walba guji/riix si aad u aragto maclumaadkeeda oo faahfaahsan.

3 Qeybta **Kooxaha (Groups)** waxaad kala socon kartaa kooxaha Schoology ee ardaygu ka tirsanyahay. Qeybtan waxaa loo isticmaalaa hawlo kala duwan, sida mashaariicda fasalka iyo hawlaho kooxaha ee iskuulka.

4 Qeybta Natijada/Imaatinka Iskuulka (**Recent Grades/Attendance**) waxaad kala socon kartaa natijida imtixaanka ee ardaygaaga. **Maclumaadka ku saabsan Imaatinka Iskuulka kama helaysid Schoology. Wuxaad Imaatinka Iskuulka ee ardaygaaga kala socon kartaa barta One Stop Campus Portal**

5 Qeybta **Xilligeedii la dhaafay (Overdue)** waxaad kala socon kartaa maclumaadka koorsooyinka ee ardaygaagu uusan ku soo celinin xilligii loogu talagalay.

6 Qeybta **Waxyaabaha Soo Socda (Upcoming)** waxaad kala socon kartaa maclumaadka koorsooyinka ee ardaygaaga iyo imtixaanada soo socda